# 1 Wareysiga Baaritaanka

"Wareysiga Yar"

UK

Haddii aad rabto inaad dalbato magangalyo UK, waa inaad tiraahdaa, "Waxaan rabaa inaan dalbado magangalyo".
Wareysiga baaritaanka caadi ahaan waxaa lagu qaadaa isla markiiba markaad timaaddo UK, mararka qaarkoodna isla maalintaas. Waxaa laga yaabaa inaad daallan tahay oo aad walaacsan tahay. Dadka badankiis ma helaan fursad ay kula hadlaan qareen ka hor wareysiga. **U diyaargarow.**"

Wareysiga lama duubo. Waxaa laga yaabaa inuu ku dhaco telefoon iyada oo turjubaanka uu sidoo kale joogayo telefoonka. Aad ayey muhiim u tahay inaad ku hadasho weedho gaagaaban, fudud oo cad (wareysiiyaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee UK waxaa laga yaabaa inuusan qorin wax kasta oo aad tiraahdo). Ku hay macluumaadka ugu muhiimsan, waxaad faahfaahin dheeraad ah bixin kartaa mar dambe wareysigaaga magangalyada (wareysiga 'weyn').

**Turjubaanka iyo Luqadda**

Waa INAAD u sheegto wareysiiyaha haddii aadan wax fahmi karin.
Waxaad xaq u leedahay turjubaan ku turjumaaya luqadda aad dooratay si cad oo aad fahmi karto. Tusaale ahaan, haddii aad ku hadasho Sorani, Ingiriisi iyo Carabi, waxaad dooran kartaa luqadda aad rabto inaad ku hadasho.

**Magacyada**

Bixi magacaaga oo buuxa iyo DHAMMAAN magacyada xubnaha qoyskaaga haddii aad rabto inay kugu soo biiraan.

**Taariikhda Dhalashada**

HA qiyaasin taariikhda dhalashadaada - tani aad ayey muhiim u tahay. Haddii aadan garanayn taariikhda saxda ah, faahfaahi sababta aad u og tahay inaad tahay da'da aad sheeganayso.

**Dadka aan Qaangaarin** (ka yar 18 sano)

**IHaddii aad ka yar tahay 18 sano**, waa inaad sharaxdaa faahfaahin inta ugu badan ee aad karto oo ku saabsan da'daada iyo sababta aad uga hubtid, tusaale ahaan, waxaan ka tagay wadankayga muddo gaaban ka dib Ramadaan markaan ahaa 15 sano jir, sidaas darteed hadda waxaan ahay 16 sano jir.
Haddii Wasaaradda Arrimaha Gudaha aysan aqbalin inaad ka yar tahay 18 sano, waxaa laga yaabaa inay kuu qaadaan huteel ay dadka waaweyn deggan yihiin ama xarunta haynta. Haddii laguu qaado huteel ay dadka waaweyn deggan yihiin, u sheeg shaqaalaha huteelka da'daada, weydii inaad aragto dhakhtar, ama u sheeg qof kasta oo aad la kulanto oo ka shaqeeya hay'ad inaad heli karto qareen kaa caawiyo. Haddii lagu xiro, waa inaad da'daada u sheegto sida ugu dhakhsaha badan xarunta caafimaadka, shaqaalaha, iyo qof kasta oo aad la xiriirto ilaa lagaa sii daayo (xor lagu dhigo).

**Ma u baahan tahay guriyeyn**

Weydii inaad ku nagaato hoygga magangalyada, ilaa aad si buuxda uga hubtid inaad la joogi karto saaxiibbo/qoys. Waxay noqonaysaa mid adag in hoygga la helo mar dambe haddii aad markii hore diidday.

**Caafimaadka Jirka iyo Maskaxda**

Haddii aad dareento inaad aad u xanuunsantahay si aad u sameyso wareysiga, **sheeg tan bilowga.**
Inta lagu jiro wareysiga, **u sheeg wareysiiyaha wixii dhibaatooyinka caafimaadka jirka ah ee aad qabto.**
Ma wax badan ayaad ka welweshaa? Ma walaac badan ayaad dareentaa? Ma dhibaato ayaad ka qabtaa hurdada ama ma qabtaa riyooyin xun? Ma inta badan ayaad dareentaa **xanaaq ama murugo?** Ma dhibaato ayaad ka qabtaa la xiriirka dadka kale? Kuwani waa calaamado muujinaya caafimaad maskaxeed liita. U sheeg wareysiiyaha.
Ka dib wareysigaaga, iska diiwaan geli dhakhtarka guud (GP) sida ugu dhakhsaha badan si aad u raadsato daaweyn.
**Haddii lagu haysto/xiro, aad xarunta caafimaadka sida ugu dhakhsaha badan oo hubi in dhibaatooyinkaaga caafimaad la diiwaangeliyo.**

**Taariikhda xabsigaaga**

Ma weligaa ku jirtay xabsi oo loola dhaqmay si xun? Tani waxay noqon kartaa wadankaaga ama intii lagu jiray safarka. **U sheeg wareysiiyaha**. Waa inaad sidoo kale u sheegtaa haddii dawladaada ama koox kale ama qof kale ay weligood ku jirdilayeen.

**Safarka aad ku timid UK**

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad sheegto dhammaan waddamada aad soo martay, oo ay weheliso codsi kasta oo magangelyo ah ama xaalad qaxootinimo oo lagu siiyay dalal kale. Haddii aan la sheegin oo markii dambe la ogaado, way dhaawici kartaa kiiskaaga.

Haddii ay ku weydiiyaan sababta aanad magangalyo ugu dalban waddan kale, waxaad sharxi kartaa haddii aanad helin habka magangalyada ama sababta aanad u dareemi wayday inaad si ammaan ah ugu sii nagaato halkaas.

**Maxaad ugu timid UK?**

Marka lagu weydiiyo tan, dheh: **"SI AAN U DALBADO MAGANGALYO"**
**Ha sheegin** sabab kale, kaliya tan.

**Si kooban u sharax sababta aadan ugu laaban karin waddankaaga**

Bixi soo koobid aad u kooban:

- Maxaa kugu dhacay waqtigii hore – maxaad uga tagtay wadankaaga?
- Haddii lagu xiray ama si xun laguula dhaqmay, sheeg taas.
- Sharax sababaha ay waxyaabahani kuugu dhaceen. Ma sababtoo ah isirkaaga, diintaada ama fikradahaaga siyaasadeed? Ma xubin ka tahay koox bulsho gaar ah ama qabiil? Ma aqoonsataa inaad tahay LGBTQ+?
- Maxaa kugu dhici lahaa haddii aad guriga ku laabato?

**Ka ganacsiga dadka**

Wareysiiyaha wuxuu isku dayi doonaa inuu fahmo haddii aad tahay dhibane ka ganacsiga dadka. Tani waxay la macno tahay in weligaa lagu qasbay inaad tagto meel aadan rabin; in lagu qasbay inaad shaqeyso iyadoo laga yaabo aan lacag lagu siin oo ay ku jirto in lagu qasbay inaad iibiso daroogada; in lagu qasbay inaad galmo la sameyso qof; in qof ku hayay meel keliya oo aan laguu oggolayn inaad ka tagto? Tani waa muhiim hadday ku dhacday wadankaaga ama intii lagu jiray safarkaaga (tusaale ahaan Libya)

**Helitaanka cadaaladda**

Caadi ahaan ma heli doontid waqti aad qareen kula hadasho ka hor intaadan samayn wareysigan; waxaad sheegi kartaa tan.

## MACLUUMAAD MUHIIM AH

Jawaabaha aad bixiso wareysiga waa inay is waafaqaan wareysiyada mustaqbalka iyo bayaanada hore ee aad ka bixisay waddan kale oo Yurub ah.

**Inta lagu jiro wareysiga**

Si fiican uga fiirso su'aalaha lagu weydiiyo. In kastoo ay u muuqan karaan kuwo fudud oo toos ah, **jawaabaha aad bixiso waa la diiwaangelin doonaa** waana aad muhiim u yihiin. Dawladda UK waxay is **barbar dhigi doontaa macluumaadka** aad bixiso iyo macluumaadka laga bixiyay dhammaan wareysiyada kale ama bayaanada kale (kuwa hore ama mustaqbalka).

**Ka dib wareysiga**

Wareysiiyaha dawladda UK wuxuu **qori doonaa waxaad** tiraahdo inta lagu jiro wareysiga.

- Waa inaad codsataa **nuqul ka mid ah diiwaanka** wareysigan baaritaanka.
- Hubi **saxnaanta** jawaabaha haddii aad awoodo.
- **Sii qareenaaga** oo weydii inay kula hubiyaan. Haddii ay jiraan khaladaad, waxaad u sheegi kartaa **Wasaaradda Arrimaha Gudaha**.